# Orientation to Ontario

## ADEEGYADA XAALADA DEGDEGA AH

### XAALADAHA DEGDEGA AH EE NOLOSHA KHATAR GELINAAYA

ADEEGYADA 9-1-1 (oo la adeegsan karo keliya marka xaalad degdeg ah jirto)

Marka caafimaadkaaga ama caafimaadka qof kale ay khatar ku jirto, wac 9-1-1 meel kasta oo aad ka joogto Canada. Lambarkaan ayaa kugu xiraaya adeegyada booliiska, gaadiidka gurmadka degdega ah iyo dab damiska. Wicitaannada 9-1-1 waa lacag la'aan, waxaana laga wici karaa laylaynka, moobilka ama taleefanka dadwaymaha.

Wac 9-1-1 marka ay jiraan xaaladaha soo socda:

- Naf ay khatar ku jirto ama qof ama hanti ay khatar degdeg ah ku jiraan (tusaale, marka dab kaco).
- Danbi uu socdo.
- Danbi daran uu dhacay qofka danbiga gaystayna uu wali meesha joogo ama ay u badan tahay inuu kusoo laabto goobta danbiga.
- Xaalado aad ka shakiday ay muujinayaan in danbi la geli rabo ama uu hadda danbi dhacay.

Marka aad wacdo 9-1-1:

- Isdeji oo si qeexan u hadal.
- Haddii aad codsato adeegyada turjumaana, ku jir khadka ilaa turjumaan lagaaga xiriirinaayo.
- Sheeg nooca adeegga aad u baahan tahay (booliiska, gaadiidka gurmadka degdega ah, danb damiska).
- Sharax xaalada.
- Sheeg ciwaanka rasmiga ah ee gurigaaga uuna ku jiro lambarka boostada.
- Sheeg magacaaga, ciwaanka iyo lambarka taleefanka.
- Ka jawaab su'aalo kasta oo dheerad ah.
- Kusii jir khadka ilaa qofka taleefanka qabanaaya uu kuu sheego inaad damiso.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan 9-1-1 Ontario, booqo opp.ca

Gaadiidka Gurmadka degdega ah - Haddii aad u baahan tahay gaadiidka gurmadka degdega ah oo ku geynaaya isbitaalka, shirkadaada caymiska caafimaadka ee Ontario ayaa dabooli karta dhammaan ama qayb kamid ah qarashka. Si aad u hesho xog ku saabsan qarashka adeegyada gaadiidka gurmadka degdega ah, booqo webseedka soo socda: findlink.at/AmbuSvBill

### XAALADAHA DEGDEGA AH EE AAN NOLOSHA KHATARKU AHAYN

Waxaa jira qaabab badan oo aad ku helayso caawimaad marka aad u baahan tahay. Xaqiiji inaad taqaano adeegyada la heli karo si aad go'aan u gaarto si degdeg ah marka xaalad degdeg ah jirto.

Booliiska – Booliiska Canada waa la isku halayn karaa. Waxay ilaaliyaan badqabka dadwaynaha waxayna ku dhaqmaan sharciga - waxay u joogaan inay na difaacaan. Waa danbi inaad laaluushto sarkaal booliis ah.

Si aad xog dheeri ah uga ogaato booliiska Ontario, booqo opp.ca

Adeegyada degdega ah - haddii aad qabto xaalad caafimaad oo u baahan daryeel degdeg

1-855-626-0002
https://orientationontario.ca

Funded by / Financé par

Ontario

Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

ah, tag adeegyada xaalada degdega ah ee kuugu dhow, oo loo yaqaano, waaxda xaalada degdega ah ee isbitaal ama xarunta daryeelka degdega ah. Isbitaallada ayaa markasta furan, laakiin waqtiga sugitaanka ayaa dheeraan kara. Si aad xog badan uga ogaato adeegyadaan, booqo ontario.ca/page/emergency-rooms iyo ontario.ca/page/urgent-care-centres

Rugaha vaafimaadka ee bilaa balanta la galo - Rugahaan caafimaadka ayaa siiya talo caafimaad iyo daryeel dadka qaba dhaawacyada ama xanuunnada fudud ee aan haysan dhakhtarka qoyska ee joogtada ah. Waxaad sidoo kale booqan kartaa rugta caafimaadka bulshada ee deegaankaaga si aad u hesho daryeel guud iyo xog. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegyadaan, booqo webseedyada soo socda: findlink.at/WakgClinic iyo findlink.at/ComHealthC

Haddii aad haysato dhakhtarka qoyska, asaga ayaa noqonaaya qof koobaad ee aad la xariirto haddii xanuun ama dhaawac yimaado. Si aad u hesho dhakhtarka qoyska booqo findlink.at/findgp

Telehealth Ontario – Si aad u hesho talo caafimaad oo guud aadna ka hesho kalkaaliso ruqsad leh, ka wac Telehealth Ontario *1-866-797-0000*. Adeeggaan waa lacag la'aan xili kasta ayaana la heli karaa. Tallada ayaa lagu baxshaa labadaba af Faransiis iyo Ingiriis, ayadoo la baxsho taageerada turjumaada ee luuqadaha kale qaarkood. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo findlink.at/telehealth

## GURYAHA XAALADAHA DEGDEGA AH IYO KU MEEL GAARKA AH

Guryaha noocaan ah waa lacag la'aan waxaana sanadka oo dhan heli kara shaqsiyaadka ku jira dhibaatada ama aan haysan meel ay seexdaan.

Haddii aadan haysan guri, lagaa saaray guriga, ama aad khatar ugu jirto in dhibaato laguugu gaysto gurigaaga, waxaad tagi kartaa xarumaha hooyga degdega ah ama hudheellada. Caadiyan, goobahaan ayaa u adeegga kooxaha qaba baahiyaha gaarka ah waxayna adeegyada ku baxshaan qaab waafaqsan. Tusaale,ahaan waxaa jira adeegyo loogu talagalay ragga, dumarka, qoysaska iyo dhalinta.

Haddii aad tahay dhibanaha rabshada qoyska, waxaad tagi kartaa hooyga ama guriga amaanka ah. Goobahaan waa kuwo amaan iyo badqab leh. Waxay baxshaa meel aad seexato waxayna baxshaan adeegyada talo bixinta ee waalidiinta iyo carruurtooda (haddii loo baahdo).

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan xaalada degdega ah ama guryaha mudada gaaban, booqo findlink.at/EmgHousing ama wac 2-1-1 ama booqo 211ontario.ca

Haddii ay jirto xaalad degdeg ah ama daran, booqo albeergada/hooyga isla markaba ama wac 9-1-1.

## LAYMANKA GURMADKA DHIBAATADA

Laymanka xaalada degdega ah waa bilaash waxayna baxshaan shaqaale ku taageeraaya, talo ku siinaaya kaana dhagaysanaaya khadka taleefanka una adeega qof kasta oo u baahan. Waa kuwaan qaar kamid ah laymanka caawimaada ee la heli karo:

Laynka Gurmadka Haweenka La wareeraro – *1-866-863-0511*. Oo u adeegga haweenka xadgudubka loo gaystay.

Adeegyada taageerada ee ragga soo maray xadgudubka galmada *1-866-887-0015*.

KidsHelpPhone *1-800-668-6868*. Oo u adeegga carruurta iyo dhalinta.

Laynka dhibaatada *1-866-996-0991*. Adeegyada caafimadka dhimirka.

Waalidiinta, qoysaska iyo Saaxiibada Ragga iyo Dumarka Qaniisiinta ah (PFLAG) Canada - *1-888-530-6777*. Adeegyada qof kasta ee qaba su'aalo ama walaacyo ku aadan dookha galmada iyo aqoonsiga jinsiga.

Laynka Caawimaada Dhalinta Ragga iyo Dumarka Qaniisiinta ah Labo Galmoodlaha iyo Labeebka - *1-800-268-YOUTH*. Adeegga dhallinta LGBTTIQQ2S ee ku dhaqan Ontario.

Si aad xog badan uga ogaato laymanka xaaladaha degdega ah ee bulshada Francophone booqo findlink.at/CrisisLine

Laymanka kale ee gurmadka ayaa ku qoran webseedka Xarunta Isticmaalka Maandooriyaha iyo Caafimaadka Dhimirka: findlink.at/CrosisReso

### OGEYSIIS MUHIIM AH

Sharciga Adeegyada Luuqadaha Faransiiska ayaa damaanad qaadaaya xaquuqda qofku u leeyahay inuu qofka kula hadlo af Faransiis marka uu waco 9-1-1 gudaha Ontario. Sidoo kale waxaa jira turjumaano lagu heli karo adeeggaan kuwaasoo ku hadla in badan 140 luuqadood – haka baqin inaad ku hadasho luuqada aad doonayso